## Qorshaha Dhaqanka ee San Diego

creativecity

San Diego waxay ku nooshahay dad hal abuur iyo awood leh. Waxaan si wadajir ah u samaynaa bulsho firfircoon oo wadaaga khibrad dhaqameed, aragti iyo dhaqan. Waxaan diyaarineynaa qorshe dhaqameed si aan u keydino awoodda dhaqamadeena badan, deegaanka, iyo caasimada hal-abuurka leh si u hormarino magaaladeena oo aan hor ugu socodsiino gobolka si uu u noqdo meel loo siman yahay oo dhiirigelin iyo barwaaqo leh.

## Waa maxay sababta loo samaynayo qorshe dhaqameed? Waa maxay sababta hadda loo samaynayo?

Isku dhex noolaanshaha dhaqanka iyo farshaxanka ee San Diego waxay muhiim ku yihiin aragtidooda iyo saameyntooda haddana waxay wajahayaan caqabado joogto ah uga imaanaya masiibada cudurada safmareenka ah iyo sare u kaca qiimaha nolosha iyo ganacsiga. Haddii qorshaha saxda ah la sameeyay, dhaqaalaheena hal abuurka leh wuxuu awood u yeelan doonaa inuu awood siiyo kobaceena iyo guusheena mustaqbalka, oo ay hogaaminayaan dad hal-abuur leh warshad kasta iyo dad farshaxan-yaqaano ah oo ka socda fanka muuqaalka iyo jilitaanka ah, filimada iyo warbaahinta. Qorshaha dhaqameedka ee Magaalada Hal-Abuurka Leh – oo ah qorshihii ugu horeeyey ee San Diego - wuxuu farshaxanka iyo dhaqanka waafajin doonaa mudnaanta dawladda Magaalada San Diego, wuxuuna qeyb ka qaadan doonaa mustaqbalka hal-abuurka leh ee xudunta nolosheenna, wuxuuna kobcin doonaa fursad weyn iyo waaritaan na wada deeqda dhammaanteen.

## Waa maxay qorshe dhaqameed?

Qorshe dhaqameedku waa qorshe muddo dheer oo dhammaystiran, kaas oo lagu horumarinayo farshaxanka, dhaqanka iyo hal-abuurka si ay uga faa'iidaystaan dadka deggan magaalada iyo sidoo kale degaanka weyn ee Cali-Baja. Qorshaha wuxuu ku salaysan yahay dhegeysi loo dhan yahay, ka-qaybgalinta dadweynaha iyo cilmi-baaris lagu sameeyo xaaladaha iyo fursadaha hadda ka jira San Diego. Hannaanka qorshaynta Creative City waxa uu ka dhici doonaa magaalada oo dhan inta lagu jiro 2023 iyo 2024. Waxaa hogaaminaya Maamulka Magaalada San Diego waxaana horjooge u ah duqa magaalada ee Todd Gloria. Qorshaha uga soo baxa Magaalada San Diego waxaa dib u eegis ku samayn doona dadweynaha, Guddiga Farshaxanka iyo Dhaqanka, iyo Golaha Magaalada, taasoo horseedaysa in Goluhu meelmariyo qorshaha kama dambaysta ah

## Maxay yihiin hadafyada Magaalada Hal-abuurka leh?

- Wuxuu si buuxda u qiimeynayaa xaalada farshaxanka iyo dhaqanka San Diego – *maxaynu wax ku kaabaynaa? Waa maxay guulaha? Waa maxay caqabadaha*
- Dhagayso waxa dadka reer San Diego ay kaga fikirayaan noloshooda hal-abuurka leh iyada oo loo marayo ka-qaybgalin bulsho loo dhan yahay – *maxaynu doonaynaa inay noqoto*?
- Hormarinta sinnaanta dhaqameed ee dhammaan dadka reer San Diego – *Sideen u xaqiijinaa isticmaalka/helitaanka weyn ee waayo aragnimada farshaxanka iyo dhaqameed ee dadka deegaanka ah iyo booqdayaasha*?
- Dejinta qaab-dhismeedka istaraatiijiga ah ee magaalada si loo hago loona xoojiyo qeybaha farshaxanka iyo dhaqanka ee San Diego – *sidee ku gaari karnaa halkaas*?
- Is-waafajinta maalgashiga Magaalada ee dhanka farshaxanka iyo dhaqanka iyo hadafyada iyo waxyaabaha Mudnaanta u leh Magaalada – *sidee farshaxanka iyo dhaqanka ay u taageeri karaan horumarada meelaha sida guryaha qiimahooda la awoodi karo, goobo amaan ah, kobaca dhaqaalaha, bulshooyinka waara, iyo dhaqdhaqaaqa dadka?*

**Nofeembar 2022 – Meey 2023**
Qorshaynta Hore iyo Cilmi-baarista

**Juun 2023-Agoosto 2023**
Dhegayso oo Kaqeybgal

**Sebtembar 2023-Febraayo 2024**
Jihooyinka Soo Ifbaxaya

**Maarso 2024-Sebtembar 2024**
Horumarint a Qorshaha

**Oktobar 2024-Nofeembar 2024**
Fikrad Ka Dhiibashada Dadweynaha ee Qorshaha

**Diseembar 2024-Maarso 2025**
Dib u Eegista iyo Qorshaha Kama Dambaysta ah

## Yaa hogaaminaya hannaanka qorshaynta?

Dadaalkan waxaa hogaaminaya Magaalada San Diego iyadoo la kaashanaysa kooxda qorsheynta dhaqanka ee ku hawlan inay hagaan hannaanka istiraatijiyadeed si wax looga qabto waxyaabaha gaarka ah ee aan ku fiicanahay, baahiyaha iyo waxyaabaha mudnaanta leh.

## Siyaabaha looga qayb qaadan karo.

**Hawlaha ka qaybgalinta dadweynaha waxaa ka mid noqon doona:**

- Aqoon-is-weydaarsiyada Creative City
- Doodaha dadweynaha ayaa laga qaban doonaa magaalada oo dhan
- Qalabka wada-sheekaysiga bulshada ee DIY
- Sahan/xog-uruurin dadweyne

**Doorkaaga ka cayaar! Ka hubi Websaydka Creative City wixii tafaasiil ah ee ku saabsan sida looga qayb qaadan karo.**

- All-city Fooramyada Creative City ee bilaha Juun iyo Luulyo
- Falanqaynta/Doodaha dadweynaha (ee dhammaan degmooyinka golaha deegaanka, bilaha Juun iyo Luulyo)
- Wada sheekaysiyada bulshada (Qalabyada shirarka DIY, la heli karo bisha Juun)
- Sahanka/Xog-uruurinta dadweynaha (wuxuu furmayaa Luulyo)
- Isdiiwaangeli si aad u hesho wixii ku soo kordha arrintaan oo la soco kanaalada warbaahinta bulshada ee Magaalada
- Ku dhiirigeli dadka kale inay ka qaybqaataan
- Dib u eegis ku sameey oo faallo ka bixi qorshaha qabyada ah
- U dood dhaqangelinta qorshaha

## Iskaan ka qaado websaydka sdcreativecity.com

Hordhac

Maanta, waxaan rabnaa inaan ku dhegeysanno. Waxaan jeclaan lahayn inaan fahamno waxa ka dhigaya bulshadaada mid gaar ah, waxa aad ku qiimeyso fankeeda iyo nolosha dhaqanka, iyo waxa aad u malaynayso in la horumarin karo ama laga duwi karo, ama waxaad rabto inaad aragto shan sano kadib. Waxaan rabnaa inaan fahanno waxa ay yihiin waxyaabaha mudnaanta gaarka ah leh ee hannaankan qorsheynta.

*Su'aalaha Doodda*

Isbarasho: *Ku wareeg qolka oo weydii dhammaan dadka inay is bartaan "sideed u qeexdaa hal-abuurnimada? "maxaad ku jeceshahay meesha aad ku nooshahay?* Laba qof ha bilaabaan kuwaas oo aad ogtahay inay ku siin karaan tusaalooyin fudud…

1. *Maxay yihiin fanka iyo goobaha/meelaha/dhaqameed ama waxqabadyada ugu qaalisan ee xaafaddaada/bulshadaada?*

2. *Maxaad ku aragtay ama kala kulantay magaalooyinka kale waxaas oo aad rabto inaad ku aragto San Diego?*

3. *Maxaad doonaysaa in fanka iyo dhaqanka u ekaado mustaqbalka - adiga, saaxiibbadaa, qoyskaaga?*

4. *Haddii aad horumarin lahayd qorshahan dhaqameed, maxay noqon lahayd 2-3 waxyaalood ee ahmiyadda ugu sarreeya leh ee aad rabi lahayd in qorshuhu wax ka qabto/ fuliyo? Maxaad doonaysaa inaad in badan ka aragto bulshadaada?*

5. *Ma jiraan wax aanaan ku waydiin oo aad jeclaan lahayd inaad nala wadaagto?*

Hagitaan & Talooyin

Fududeeyaha/Daadi'iyaha

Fududeeyaha ayaa noqon doona qofka waydiinaya su'aalo aad u feejigan isla markaana dhexdhexaadin doona doodaha ay yeelanayaan dhammaan ka qaybgalayaasha. Fududeeyaha ayaa mas'uul ka ah diiwaan gelinta fikradaha, ra'iyada, iyo mawduucyada dooda. Waxaa fiican in lahelo qof la shaqeeya daadi'iyaha oo ka caawiya qorista qoraalada, qaadista sawirada, iwm.

Talooyinka Loogu Talagalay Daadi'iyaha:

- *Xooga saar ilaalinta sirta/qarsoodinimada xogta kooxda - dhammaan xogta waxaa loo sheegi doonaa oo kaliya si wadareed (macluumaadka waa inaan lagu aqoonsan shakhsi)*
- *Had iyo jeer ixtiraam qof walba ra'yigiisa*
- *Martiqaad oo dhiirigeli fikrado, iyo aragtiyo kala duwan*
- *Ku dhiirigeli kooxda in ay wax macno leh wada samaystaan*
- *Tixraac ku sameey faallooyinka iyo fikradaha kooxda si ay u sii wadaan dooda*
- *Ku lug lahaanshaha kooxda 85%, ka qayb qaadashada fududeeyaha 15%*

Tirada Kooxda iyo Muddada
Isku day inaad isu geyso koox ka kooban ugu yaraan 4-5 laakiin aan ka badnayn 20 qof. In kasta oo, koox kasta oo tiradey doontaba ha ka koobnaadeene haddiiba yeelanayaan dood wanaagsan oo ku saabsan geeddi-socodkan ay qiimo leedahay. Dooda inta badan waxay qaadataa qiyaastii 30 - 60 daqiiqadood.

Agabyada

1. Xaashida Xaadirinta
2. Hagaha Dooda/Waxqabadyada Tusaalo Bixinta ah
3. Qoraallada Guudmarka Habraaca Qorshaynta

Fadlan maskaxda ku hay….

~ *Kulan kastaa wuxuu ka duwanaan karaa kulamada kale. Kooxaha qaar ayaa laga yaabaa inay rabaan inay yeeshaan doodo dheer, qaarna waxa laga yaabaa inay wakhtiga diiradda saaraan.*

~ *Hagida dooda waa - hagayaashaas. Xor u noqo in aad wax ka bedel u samayso si waafaqsan codkaaga iyo qaabkaaga. Dooda waxa laga yaabaa inay ku hareereysanaato meelaha gaarka ah ee ku taxan hagaha.*

~ *Taasi waa wax aad u fiican haddii ay dooda ay weli ku saabsan tahay fanka iyo dhaqanka iyo horumarinta dhaqaalaha. Inta badan xaaladaha CAJIIBKA AH! Waxay ka yimaadaan bulshada!*

Hannaanka kulanka:

- Hordhac
- Qeybi dukumeentiyda hannaanka qorshaynta.
- Dood iyo Su'aal Isweydiin
    - Soo bandhig su'aal oo haddii aad rabto bixi tusaalahaaga ama sheekadaada si aad dooda uga dhigto mid socota.
    - Isticmaal baaritaanno iyo su'aalo daba-gal ah haddii jawaabuhu yihiin kuwo aan caddayn.

Qoraal qoris:

- Dhageyso mowduucyada iyo fikradaha muhiimka ah
- Fadlan qor wixii xigashooyin/oraahyo wanaagsan ah ee aad maqashid!
- Meel ku qoro haddii aad maqasho jawaabo isku mid ah oo ka imanaya xubno badan/ama kooxo badan - (tusaale ahaan, haddii xubnaha oo dhami isku raacaan in uu jiro HAL shay oo geedi socodka qorshayntani ay tahay in lagu daro).
- Ka warhay haddii aad u malaynayso inay jiraan shakhsiyaad ay tahay in dabagal lagu sameeyo kulanka kadib.

Gudbinta Agabyada

- Qoraalada waa in lagu qoraa Word ama Google Docs
- Dhammaan qoraallada, iyo sawirrada waxa lagu soo diri karaa iimaylka linda@culturalplanning.com.

creativecity

## Xaashida Xaadirinta

| Magaca hore | Magaca Dambe | Ururka | Iimaylka |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

# Waxqabadyada Tusaalaynta Bulshada

*YOOLKA: Waxqabadyadan waxay ujeedadoodu tahay in lagu caddeeyo macnaha hal-abuurka, farshaxanka iyo dhaqanka ee xaafaddaada ama bulshadaada. Waxay u badan tahay inaad hesho macnayaal badan oo xitaa iska hor imanaya kuwaas oo aan mararka qaarkood ku soo bixin wada sheekaysiga. Waxaad waxqabadyadan u isticmaali kartaa bilaawida wada sheekaysi, dhiirigelin ahaan si aad ula timaado ciyaarahaaga, ama qaab dhismeed aad wax uga bedeli karto hadba sidaad rabto.*

<u>Xulashada #1-aad ee Waxqabadka: Ka fikiritaanka xaafadayda/bulshadayda ama kooxdayda, yaan nahay?</u>
Weydii dadka inay kala doortaan 1) meel xaafadaada ka mid ah oo ka turjumaysa dhaqanka ama hal-abuurka bulshadaada, ama 2) farshaxan xaafaddaada yaala, ama 3) qof xaafadda aad looga yaqaan oo ha qoraan/sawiraan/ha matalaan taariikhda meeshaas/farshaxankaas/qofkaas. Markaas kadibna qof kastaa ha wadaago qormadiisa. Haddii aanay garanayn taariikhda, way iska alifan karaan.

Weydii dadka su'aalo gaar ah, *tusaale ahaan:*

- Meesha maxaa loo isticmaali jiray maxaase hadda loo isticmaalaa?/ Goorma ayaa la sameeyay farshaxanka, sababteese loo sameeyey?/ Waa maxay taariikhda nololeed ee qofka?
- Waa maxay sababta ay goobtaas/farshaxankaas/qofkaas ay muhiim ugu yihiin bulshadan?
- Waa maxay sababta ay goobtaas/farshaxankaas/qofkaas ay u matalaan hal-abuurka?
- Sidee goobtaas/farshaxankaas/qofkaas u matalaan bulshadaada guud ahaan?
- Sideese u muuqdaa mustaqbalka goobtaas/farshaxankaas/qofkaas? Maxay rabaan inay noqoto?

Talo: *Fiiro gaar ah u yeelo sida ay dadku uga hadlayaan waxa u gaarka ah xaafadooda.*

<u>Xulashada #2-aad ee Waxqabadka: Muxuu farshaxanka, dhaqanka, iyo hal-abuurka kaga dhigan yahay bulshadeena dhexdeeda?</u>

Weydii ka qaybgalayaasha inay sawiraan ama sharaxaan xaafadooda oo ay uga fikiraan mustaqbalka ahaan ama wax kale ahaan…

1. Hadii ay bulshadeenu/xaafadeenu ahaan lahayd farshaxan, maxay ahaan lahayd? Sabab?
2. Maxaad ku sifayn lahayd istaaylka xaafadda ee dhanka muusigga? (raab, qadiimi, muusig adag, indie) sabab?
3. Anagoo mustaqbalka eegayna, maxaan rabnaa in bulshadayada/xaafadeena caan ku noqoto?

**Doodaha Bulshada Magaalada Hal-abuurka**
**Guudmarka Qoraallada**

Taariikhda Dooda/Wada-hadalka: ________________________

Goobta (oo ay zip koodhka): __________________________________

Iskuduwaha/Daadi'iyaha: ____________________________________________

Caawiyaha Daadi'iyaha (haddii ay jirto):___________________________________

Ururka (haddii ay jiraan): ________________________________________

# dadka ka soo qaybgalay: ___________________________________

Sharaxaada dadka ka soo qayb galay:

_______________________________________________________

_______________________________________________________

_______________________________________________________

_______________________________________________________

Sharaxaada dadka ka soo qayb galay:

- Dhageyso mowduucyada iyo fikradaha muhiimka ah
- Fadlan qor wixii xigashooyin/oraahyo wanaagsan ah ee aad maqashid!
- Meel ku qoro haddii aad maqasho jawaabo isku mid ah oo ka imanaya xubno badan/ama kooxo badan - (tusaale ahaan, haddii xubnaha oo dhami isku raacaan in uu jiro HAL shay oo geedi socodka qorshayntani ay tahay in lagu daro).
- Ka warhay haddii aad u malaynayso inay jiraan shakhsiyaad ay tahay in dabagal lagu sameeyo kulanka kadib.

Gudbinta Agabyada

- Qoraalada waa in lagu qoraa Word ama Google Docs
- Dhammaan qoraallada, iyo sawirrada waxa lagu soo diri karaa iimaylka linda@culturalplanning.com

**GUUDMARKA QORAALLADA: (Fadlan isticmaal hadallo kooban iyo dhibcaha qodobada)**

- Goobaha/meelaha/ama waxqabadyada dhaqameed iyo fanka

- Waxyaalaha aad kala soo kulantay magaalooyinka kale ee aad rabto inaad ku aragto San Diego

- Sida mustaqbalka fanka iyo dhaqanka u eg yahay

- 2-3 waxyaabood ee ahmiyadda ugu sarreeya leh

- Fikrado/Ra'iyo Dheeraad ah:

- Loogo buluug iyo liimi ah{MQ}Sharaxaadda waxaa si otomaatig ah loo soo saaraa markay jirto kalsooni hoose

creativecity

Waxaan ku noolahay:

Magaalada San Diego
Degmada San Diego
Meel kale
Magaalada aan ku noolahay waa:

____________________

Sideed ku aqoonsan kartaa jinsigaaga? Fadlan goobaab geli DHAMAAN inta khuseysa.
Rag Jinsigiisa Ballaaran
Jinsi Bedelmay
Rag Naag Isku Bedelay
Naag Nin Isku Bedeshay
Naag Labada Jinsiba Leh
Weli ma go'aansan iyo/ama su'aa ka taagan.
Waxaan doorbidayaa inaanan shaaca ka qaadin.
Waxaan doorbidayaa inaan qeexo jinsigayga:

________________

Da'daydu waa...
Ka yar 21
21 ilaa 34 sano
35 ilaa 44 sano
45 ilaa 54 sano
55 ilaa 64 sano
65 ilaa 74 sano
75 jir iyo ka weyn
Waxaan doorbidayaa in aanan sheegin.

Midkee ka mid ah kuwaan soo socda ayaa qeexaya aqoonsigaaga isireed ama qoomiyadeed? Fadlan dooro DHAMMAAN inta khuseysa.
Hindi Mareykan ah ama Alaska Dhalad ah, Ka Soo Jeeda Bariga Aasiya
Madow ama African American ah
Latinx ama Hisbaanik ah
Ka Soo Jeeda Bariga Dhexe/Waqooyiga Afrika
Koonfurta Aasiya
Hawaii Dhalad ah ama Ka Soo Jeeda Jasiiradaha Baasifigga
Caddaan ah
Waxaan doorbidayaa inaanan shaaca ka qaadin.
Aan kor lagu sheegin, fadlan sharaxaad ka bixi:

__________

Mahadsanid!!